# FAAFIN RASMI AH

جريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 17aad Muqdisho 1da Maarso 1989 L. 3

جريدة شهرية FAAFIN BIL SOO BAXA

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka 1 aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## KOOBNIIN

### QAYBTA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 12 ee 14 Feb. 1989, Heshiiska Kirada Airbas A310-300 (Credit Bail) Bog; 116

### QTYBTA LABAAD

### X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 15 ee 22 Feb. 1989, Abuurid Kuliyadda C.Q.Sida ee Jaalle Siyaad. » 118

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 16 ee 12 Feb. 1989, Magacaabid Nootaayo » 121

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA I, 2 ee 13.3.88, Aqoonsi Ururka Samafalka Istager. » 122

## QAYBTA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 9.1.89, Lumid J J/War. ku qoran Ibraahim Maxamed Cali L. 56 » 136

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 28.2.89, Lumid B/Keyd L. 3213 ku qoran Faay Dheere Qumane L. 57 » 137

MAXKAMADDA GOB. W/GALBEED 8.2.89, Lumid J/War. ku qoran Ismaaciil Xaashi Diiriye L. 58 » 138

MAXKAMADDA G. BANAADIR 1.3.89, Lumid Jeeg War. L. 0272368 ku qoran Xasan Maxamed Cariif L. 59 » 139

MAXKAMADDA G. BANAADIR 1.3.89, Lumid Jeeg War. L. 0296158 ku qoran Ibraahim Cali Gaaboow L. 60 » 140

MAXKAMADDA G. BANAADIR 8.2.89, Lumid Jeeg War. L. 1184269 ku qoran Aamina Maxamuud Baaruud L. 61 » 141

MAXKAMADDA G. BANAADIR 1.3.89, Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Cabdi Xasan Cabdi L. 62 » 142

## QAYBTA KOWAAD

## S H A R C I

SHARCI L. 12 ee 14 Feberaayo 1989, Heshiiska Kirada Airbus A310-300 (Credit Bail).

### MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D. Soomaaliyeed.

ISAGOO ARKAY: Dastuurka iyo Xeer Nidaamiyaha Lagu Dhisay Shirkadda Dayuuradaha Soomaaliyeed iyo Sharci Lamb. 2 ee 17 Disembar 1979 habeynta Sharciga Somali Airlines.

MARKUU ARKAY: Sharci Lr. 5 ee 5ta Nofembar 1966 (sharciga Canshuuraha Macaashul-Macaashka) Xeer Madax weynaha Lr. 109 ee 14ka Nofembar 1973 (Ujuurada Maxkamadaha Qodobada 313-315 ee Xeer habka madaniga (Aqoonsiga Xukuumada Shisheeye), Qodobka 681 ee Xeerka Madaniga (la wareegid milkiyad).

MARKUU TIXGELIYEY: In Somali Airlines haysaato fursad ay kula gasho heshiis kiro iib ee Dayuurad nooca AIRBUS A310-300.

MARKUU TIXGELIYEY: Heshiiska maalgelinta ee Somali Airlines kula geleyso Sharikad caalami ah ee Lacageed kuna saabsan hashiis kiro-iib ee Dayuurad AIRBUS A310 300 oo milkiile ka noqon doonto kaddib markii ay dhameystirto kiro bixinta.

MARKUU TIXGELIYEY: Inay tahay lagama maarmaan In macaamilkaas loo fidiyo canshuur dhaaf iyo wax ka bedelid shuruucda kor ku xusan.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Wasiirka Gaadiidka Cirka Iyo Dhulka, Oggolaanshada Golaha Wasiirada iyo Golaha Shacbiga Qaranka.

WUXUU SOO SAAREY SIARCIGA SOO SOCDA:

### Qodobka 1aad CANSHUUR DHAAF

Kireeyaha Dayuuradda Nooceedu yahay AIRBUS A310-300 Farsamo taxan Lr. ———Diiwaan Lr. ———Waxaa laga dhaafay canshuuraha dalka nooc kasta ha ahaadee toos ama mid dadban (Sida) macaashul-macaashka, boolada iyo dii-

waangelinta, canshuuraha furdada) oo hadda jira ama soo baxa mustaqbalka kana soo baxa Dawladda Dhexe Ama Dawladda Hoose.

Haddii hay'ad Lacageed oo kale la wareegto mowqifka Kireeyaha ee Dayuuradda la tilmaamay, waxaa si toos ah Loo aqoonsanayaa canshuur dhaafkaan.

Qodobka 2aad LA WAREEGID (EXPROPRIATION

Dayuuradda Airbus ee ujeedada sharcigaan loolama wa reegi karo dan guud awgeed tan iyo ilaa qiimaheeda oo dhan Laga siiyo kireeyaha taasoo waafaqsan heshiiska kirada.

Qodobka 3aad KA DHAAFID DIBAAJIGA MAXKAMADAHA

Kireeyaha ama hay'ad kasta Lacageed oo la wareegta mowqifka kireeyaha Dayuuradda AIRBUS oo tilmaanteedu ku qoran tahay qodobka koowaad ee kore waxaa laga dhaafay dibaajiga Maxkamadaha oo la bixiyo marka dhinac uu dacwo oogayo.

Qodobka 4aad AQOONSIGA XUKUNKA DIBADEED

Iyadoo wax laga bedelayo xeerka madaniga iyo xeerka habka madaniga, waxii dacwo ah oo ka dhasho tariimada iyo fulinta heshiiska kirada ee kor ku xusan waxaa lagu garnaqayaa Maxkamadaha iyo shuruucda dalka laga diiwaangeliyey dayuuradda oo labada dhinac isku waafaqeen iyadoo Maxkamadaha Soomaaliyeed aqoonsan doonaan xukunka Maxkamadahaas oo lagu soo saaro sifo sharcigaas waafaqsan toosna wey u dhaqangelin doonaan xujo la'aan iyo dib u dhageysi la'aan.

Qodobka 5aad BURIN SHARCI

Waxaa la buriyey sharci kasta oo ka soo horjeeda ama La socon karin qodobada kor ku qoran.

Qodobka 6aad DHAQANGELIN

Sharcigaan wuxuu dhaqangelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

Muqdisho, 14 Feb. 1989.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

## QAYBTA LABAAD

## X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 15 ee 22 Feb. 1989 Abuu-rid Kulliyadda C.Q. Sida ee Jaalle Siyaad.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad Faqradda 14aad ee Dastuur ka J.D. Soomaaliya.

MARKUU ARKAY: Qod. 1aad Sharciga Lr. 15 ee 6.4.60 ku saabsan Dhismaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Qod. 13aad Sharci Lr. 14 ee 3.6.62 ku saabsan Dhismaha Dawladda.

ISAGOO TIXGELIYEY: Baahida Loo qabo in Dalka Gudi-hiisa lagu diyaariyo Saraakiil aqoon iyo aragti mideysan u leh hoggaaminta C.Q. Sida.

ISAGOO DHEGEYSTAY: Soo Jeedinta Wasiirka Wasaarad-da Gaashaandhigga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

### Qodobka 1aad

### DHISMAHA KULLIYAD.

B) Waxa la dhisay Kulliyadda C.Q. Sida ee J/le Siyaad

T) Kulliyaddu waxa lagu Tababarayaa Layli Saraakii-sha ku soo biiraysa C.Q.S. si kor loogu qaado tayadooda iyo Aqoontooda.

### Qodobka 2aad

Kulliyadda waxaa soo geli kara.

B) Arday Soomaali ah oo sita Shahaado ee «Dugsi Sare ama u dhiganta» Soona gutay Shaqada Qaranka.

T) Waa in da'diisuna ayan ka yarayn 18 Sano kana weyneyn 25 Sano.

J) Xulashadu waa tartan imtixaan iyo baaris Caafimaad.

X) Ardaygu waa inuu noqdaa Labood hase yeeshee Dhi-ddig waa la qaadan karaa haddii ay timaado baahi ka dib [illegible]

[illegible]

Qodobka 3aad

B) Codsi ka dib, Kulliyaddu waxay qaadan kartaa imtixaan La'aan Arday Soomaali ah oo sita Shahaado Jaamacadeed, ha ahaato mid laga qaatay J.U.S. ama mid dibedda ah. Haddii ay buuxiyaan Takhasusyada ay Ciidamadu u baahan yihiin.—

T) Ardaygaas wuxuu marayaa Tababar 12-18 bilood hadba baahidu inta ay la egtahay.

J) Ardayga ku xusan Faqradda kowaad ee qodobkan waxa loo aqoonsanayaa darajada 2 (Laba) Xiddigle. ka dib markii av soo dhammeystaan Tababarka ku xusan Faqradda 2aad ee isla qodobkan.

Qodobka 4aad

ARDAYGA LOO QAATO KULLIYADDA

B) Waxa lagu magacaabayaa Layli-Sarkaal.

J) Darajo Ciidan Looma aqoonsan karo ilaa uu Layli-Sarkaalku ka soo qalinjebiyo Kulliyadda C.Q. Sida xitaa hadduu ahaa Askari.

J) Layli-Sarkaalka oo Askari ahaa hadduu Kulliyadda ka soo qalinjebin waayo wuxuu wadanayaa darajadiisii hore.

Qodobka 5aad

SANADKA WAXBARASHADA

B) Sanadka Waxbarashada Kulliyadda C.Q. Sida waa Laba Sano.

T) Barnaamijka Waxbarashada iyo qalinjebinta waxa Lagu jaangoynaya Labadaa Sano.

J) Sanadka Waxbarashada waa la soo gaabin karaa. haddii ay yimaadaan duruufo gaar ahaaneed.

Qodobka 6aad

Layli-Sarkaalku markii uu ka soo qalinjebiyo Kulliyadda waxa loo aqoonsanayaa «Xiddigle» ka tirsan Saraakiisha C.Q. Sida, wuxuu yeelanayaa Xuquuqda ay leeyihiin Saraakiisha la darajada ah.

Wuxuu kaloo qaadanayaa Shahaadadii qalinjebinta ee Kulliyadda C.Q. Sida.

Qodobka 7aad

Kulliyaddu waxay yeelanaysaa Calan leh Astaan iyada u gaar ah, sida qaybaha kale ee Xoogga Dalka Soomaaliyeed

Qodobka 8aad

Kulliyaddu waa tan keliya ee ka jirta Dalka Gudihiisa oo Lagu Tababaro Layli-Saraakiisha ku soo biiraysa C.Q.S.

Qodobka 9aad

Layli-Saraakiishii ka soo qalinjebisay Kulliyadda Xeer-kan ka hor waxa lagu dhaqaayaa isla Xeerkan.

Qodobka 10aad

Xeerkan wuxuu dhaqan alayaa marka uu saxiixo Madax weynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmi-ga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 22 Feb. 1989.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Jaalle Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L.16 ee 12 Feb. 1989 Magacaabid Nootaayo.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Sharciyada Lr. 8 ee 15.2.1961 iyo Lr. 1 ee

ISAGOO ARKAY: Qodobka 2aad ee Sharciga Lr. 7 ee 2.2.86 2.3.1968 kuna saabsan hawlaha Nootaayada.
oo awood u siinaya Madaxweynaha J.D.S. inuu si toos ah iyo tartan La'aan u magacaabo Nootaayo qofkii mudan.

ISAGOO TIXGELINAYA: Talada uu soo jeediyay Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

J/le Cabdikariin Xasan Qorod waxaa loo magacaabay Notaayo Xamar, wuxuuna hawshiisa ku fulinayaa magaalada Muqdisho.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana Lagu soo saarayaa Faafinta Rasmigga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 12 Feb.1989.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Jaalle Maxamed Siyaad Barre

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 2 ee 13.3.1988
AqoonsiUrurka Samafalka Istaageer Agricultural Dedelopment.

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharci Lr. 30 ee 30.7.84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO ARKAY: Qod. 54/2 ee Xeerka madeniga Soomaaliyeed Lr. 37 ee 2.6.1973;

ISAGOO ARKAY: Xeerka lagu dhisay Ururkaas Samafalka ah;

ISAGOO TIXGELIYEY: Iney lagama maarmaan tahay abuurista Ururrada noocani ah.

WUXUU GUDDOONSHAY

Qod. 1aad

Waxaa si Rasmi ahaan loo aqoonsaday Ururka Samafalka Istaageer Agricultural Development oo ah Urur Samafal, Ujeedadiisuna tahay inuu gacan ka geysto baahida Beeraleyda yar-yar si ay u kordhiyaan wax soo saarkooda dhinaca Cuntada.

Qod. 2aad

Ururku wuxuu Saldhiggiisu noqonayaa Magaalada Muqdisho, wuxuuna Laamo ku yeelan karaa Gobollada iyo Degmooyinka.

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu Saxiixo Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

Muqdisho, 13.3.1988

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA
(Dr. Maxamed Cabdulle Bacadle)

# SHARCIGA HAYADA

I. MAGACA:

Hayada magaceeda waxaa la yiraahdaa Istaageer Agricultural Development, waxaana loo aqoon sanayaa «Istaageer».

II. TARJUMAD/MICNAYN:

1. Istaageer: Xaraikaan, markii Af-Soomaaliga loo eego, tastuurkaan dhexdiisa micnaha uu ku leeyahay waxaa weeye, isturin, iscawimid iyo isu adeegid.

2. Marka sidii ay ku haboon tahay, tastuurkaan dhexdiisa labka iyo dhediga isku si ayaa loo qaadanayaa, wadar iyo waaxidna waa isku jiraan.

III. UJEEDADA HAYADA LOO ASAASAY:

Hayadaan Istaageer waxaa loo asaasay in ay gacan ka geysato baahida beeraleyda yaryar si ay u siyaadshaan wax soo saarkooda dhanka cuntada isku filaan shanoodana kor ugu qaadaan.

IV. HAYADA XARUNTEEDA:

Hayada xarunteeda waxay ku oolaysaa Xamar, hase ahaatee, haddii loo baahdo ama ay balaarato hayada shaqadeedu, waxaa laamo laga furi karaa meelihii ku haboon oo wadanka gudihiisaa, khaas ahaan nawaaxiga beeraha.

V. UJEEDOOYINKA HAWLEED:

Sugitaanka isku filaanta dhanka cuntada iyo wax soo saarku, waa waajibka ugu horeeya oo ummad kastaa saaran, arrintaas oo ah baahi Soomaaliya hadda ka taagan aadna uga fog dhamaystir. Hayadaan Istaageer waxay si weyn isugu taxalujinaysaa iyadoo la kaashanaysa hayadaha kale oo samafalkaa (kuwa gudaha iyo kuwa dibedaba) inay gacan ka geysato horumarinta beeraha. Hayadu waxay si khaas ah isugu taxalujinaysaa horumarinta beeraleyda yaryar, tacabiinta beeraha ee beeraleyda yar yar iyo horumarinta mashruucyada yar yar.

Istaageer waxaa ujeedooyinkeeda laf dhabar u ah inay door weyn ka gasho wax ka qabashada cunta yarida taasoo ku dhisan qorsha dheer.

Istaageer waxay ahaanaysaa hayad aan siyaasi iyo faa'iido doon midna ahayn (NGO), waxay fulinaysaa ujeedoo-

yinka halkaan ku qeexan.

1. Inay ka caawinto beeraleyda yar yar dhanka sharciga ee helitaanka dhulka beeraha.

2. Inay siiso hadba tabartu say tahay, beeraleyda yar yar taageero dhanka farsamada iyo talada.

3. Inay ka caawinto dhanka waraabka beeraha (kanaallo iwm.)

4. Inay ka caawinto dhanka qodida ceelasha (ceelasha gacanta).

5 Soo saarida iyo gacan ka siinta bacrinta beeraha (fertilizers).

6. Inay gacan ka siiyaan dhanka dabargoynta cayayaanka beeraha.

7. Ka taageerida qalabka yar yar ee beeraha iyo kuwa waaweynba.

8 Gacan ka siinta dhanka tacaliinta beeraha iyo tacaliinta kalaba.

9. Inay samayso meelaha lagu barbaariyo geedaha, si beeraleydu u hesho geedaha khudaartu ka baxdo iyo kuwa hooska. iyo in la sameeyo barnaamij geed abuurka (forestry projects).

10 Abuurista mashruucyo yar yar oo bulshada u soo jiida dakhli dhaqaale.

11. Dhaqashada iyo xanaanada xoolaha, iyo soo saarida farmaajada iyo subaga.

12. Caafimaadka (dawooyinka, qalabka isbitaalada iyo shaybaarka).

13 Ka qayb gelida arrimaha masiiboovinka dhanka cunta yarida iyo daadadka iyo fatahaada wabiyaasha.

14 Soo saarida burjiko qoraxeedka (solar stoves) iyo dib u habaynta aluuminamka (alluminuim recycling).

15. Iyo gacan ka geysashada iyo samafalka wixii kale oo hayad samafal ahi samayn karto sida dharka iyo huga kale ee taakuleynta dadka tabaalaysan (Anything of relief and development materials for the community).

VI UJEEDOOYINKA IYO SHARCIYADA KALE OO HAYADA:

1. Inay hayadu wax la qabsato oo isla jir ula shaqayso hayadaha kale oo samafalka kuwa gudaha iyo kuwa dibe-

daba.

2. Inay hayadu ku darman karto hayad kale oo samafal ah, wixii lihi ah oo hayada wax ugu yaalna ay ka qaadan karto, haddii waxaasi wax Istaageer ujeedooyinkeeda waafaqsan yihiin, bulshadana wax ugu yaal.

3. Inay hayadu dhanka maaliyad kala xiriiri karto wax ra ka raadsan karto hayadaha ama shaqsiyaalka gacan siiya samafalka, iyadoo si sharciga waafaqsan danina ugu jirto bulshada faa'iido raadsina aysan ku jirin arrintaas u meel marinaysa.

4. Inay hayadu fuliso ujeedooyinkeeda iyadoo ku tala geleysa masuuliyadna u qaadaysa, intii karaan keeda, kharajka maamulka hayada.

5. Hayadu waxay xaq u leedahay inay ama aqbasho ama diido wixii caawimaad ah oo cid kale u soo gudbiso.

6 Hayadu waxay xisaab ka furan kartaa haday maamulka hayada ula muuqato wax loo baahan yahay bankigii ay doonto.

VII GUDDIGA MAAMULKA HAYADA:

1 Guddoomiye
2 Guddoomiye ku_xigeen
3 Maareeye
4 Khasnaji/xisaabiye
5 Xoghaye

Waxaa dhici karta haddii ay Asaasayaasha hayada la haboonaato inaan mararka qaarkood jagooyinkaas kor lagu soo sheegay qaarkood lagu isticmaalin. Guddiga Maamulka hayada tiradoodu kama yaraan karto saddex (3) xubnood kama badnaan karto todoba (7) xubnood taasoo ku xiran go'aanka asaasayaasha. Maamulka, shaqada iyo wixii hayadu leedahay oo dhan waxaa maamulaya asaasayaasha oo adeegsan kara guddiga maamulka hayada.

Si hayada shaqadeeda iyo ujeedooyinkeeda lagu fuliyo guddiga maamulka hayadu wuxuu awood u leeyahay inuu qorto shaqaale u qalma shaqada, waxaana lagu amaal iyo xaq marinayaa shaqaalaha sidii lagula heshiiyo. Haddii ay qaadaan asaasayaasha hayadu in shaqsi shaqaalaha hayada ka mid ahi ku kacay waxyaabo ka soo horjeeda danaha iyo ujeedooyinka hayada, Asaasayaashu arrintaas waa inay ka

qaadaan ficilka ku haboon waqti xadudan.

## MASUULIYADA XUBNAHA GUDDIGA MAAMULKA HAYADA:

1. Guddoomiye

Guddoomiyaha masuuliyadiisu waa inuu fadhiyada ama shirarka guddiga maamulka socodsiiyo hadaan wax dhibaato shi ka hor istaagin. Waxuuna qabanayaa wixii caadi ahaan shaqo guddoomiye ah.

2 Guddoomiye ku-xigeen

Guddoomiye ku-xigeenku waxuu la shaqaynayaa Guddoomiyaha, waxuuna qabanayaa shaqada guddoomiyaha marka uu maqan yahay.

3 Maareeyaha

Maareeyaha shaqadiisu waa inuu masuul ka yahay hawlaha fulinta hayada dhan kastaba ha ahaatee. waana inuu shaqada guddoomiyaha qabtaa markii loo baahdo.

4 Khasnajiga/xisaabiyaha

Iyadoo ku xiran hadba sidii maamulku go'aansho xisaabiyuhu waxuu masuul ka yahay arrimaha lacag qabashada iyo lacag bixinta ee hayada isagoo muujinaya rasiidyada iyo fowjariska arrimahaas la xiriira. Guud ahaan xisaabiyuhu waa inuu hayaa oo kaydiyaa hayada xisaabaadkeeda buugteeda lacagta una diyaarsho xisaabaadka bishiiba hal mar isagoo tusaya oditarada markii loo baahdo.

5 Xoghayaha

Qabashada shaqada guud ee xoghaynta ka sokow xoghayuhu waxuu qaabilsan yahay arrimaha la xiriira korishoondansiga, diyaarinta fadhiyada guddiga maamulka haynta iyo kaydinta go'aamada guddiga.

## VIII SHIRARKA GUDDIGA MAAMULKA HAYADA:

Guddiga Maamulka hayadu wuxuu yeraan bishiiba hal mar hay shir yeelanayaan shirkana waxaa madax ka ah guddoomiyaha markuu maqan yahayna guddoomiye ku-xigeenka, ama haday labaduba maqan yihiin maareeyaha. Markii shir la leeyahay wuxuu yeraan boqolkiiba konton waa inay guddiga maamulka ka joogtaa.

Qofkii ka maqnaada saddex jeer oo isku xigta fadhiga guddiga Guddoomiyaha iyo guddiga intiisa kale ayaa go'aan ka gaareysa arrintiisa.

IX GUDDIGA LA TALINTA (ADVISORY COMMITTEE)

Guddiga La Talintu waxuu ka kooban yahay saddex ilaa afar qof oo labo takhasus beeraha iyo khibrad leedahay, hal dhaqaale yahan ah ama maamulka.

X. TAAGEERADA HAYADA (U FIDINTA TAAGEERO HAYADA)

Qofkii ama hayadii doontaa waa taageeri kartaa hayada, iyadoo loo eegin dhan diin, waddan, dhalasho iyo wax kale midna, haday arrintaasi waafaqsan tahay sharciga iyo ujeedooyinka hayada Istaageer. Cidii taageero bixisaa dib uma ceshan karto wax khaas ahna ma tirsan karto oo hayada ..geedaa.

XI. ASAASAYAASHA HAYADA

Asaasayaasha oo xubno ka noqon kara, guddiga la talinta iyo kan Maamulka labadaba, waxay ahaanayaan kuwa leh go'aan kama danbaystaa ee wax alla wixii la xiriira arrimaha hayada. Wixii ka hor imaanaya danaha iyo ujeedooyinka hayada waa joojin karaan. Asaasayaashu waa agaasin joogtaa ee hayada ilaa ay ka geeriyoodaan.

XII. FATASHKA XISAABAHA (AUDITING)

Sannadkiiba mar waxaa Asaasayaashu xil saarayaan hal ruux oo fatasha xisaabaadka hayada. Fatashuhu waa inuu san ka tirsanayn maamulka hayad.a Xisaabiyaha hayadu waxuu u ogolaanayaa fatashaha xisaabaha wixii dokumeenti ah oo xisaabaad la xiriira. Fatashka xisaabuhuna waxuu caddeynayaa khaladka ama saxnaanta xisaabaadka hayada.

WAX KA BADELIDDA TASTUURKA HAYADA

Tastuurka hayada wax waa laga bedeli karaa haddii ay isla ogolaadaan guddiga maamulka hayadu intiisa badan iyo asaasayaasha hayada, waxaase go'aanka kama dambaysta leh asaasayaasha.

BAABI'INTA AMA XIRIDDA HAYADA

Haddii Asaasayaashu, iyagoo la tashanaya Guddiga Maamulka iyo Guddiga La taliyaasha, ay gartaan inay haboon tahay in hayada la baabi'iyo oo la xiro, ama ay u gartaan in aysan faa'iido bulshada u lahayn sii wadideedu hayada waa la xiri karaa. Haddii hayada la baabi'iyo, hayada

hantideeda markii laga jaro wixii hayada lagu leeyahay, wixii soo hara waxaa la siin karaa hayad kale oo samafal ah, ama waxaa loo maamulayaa sidii ay Asaasayaasha ugu talyaan ama ay ula haboonaato. Masuuliyada Asaasayaasha wax waa laga bedeli karaa haddii loo baahdo oo intooda badani isku raacdo.

XV. Magacyada iyo masuuliyada Asaasayaasha (ahna milkiilayaasha)

| Magaca | Masuulka | Masuuliyada |
|---|---|---|
| 1. | Dr. Xasan Xaashi Fiqi | Guddoomiye |
| 2. | Sheekh Maxamed Maxamuud Fiqi | Guddoomiye ku-xigeen |
| 3. | Dr. Xersi Axmed Maxamuud | Maareeye |

XAFIISKA SOOTAAYADA XAMAR

SAXIIXA LA SUGAY

Saxiixyada kor ku qoran waa kuwii dhabta ahaa ee Jaalle Dr. Xasan Xaashi Fiqi, Soomaali ah degan Xamar, iyo Sheekh Maxamed Maxamuud Fiqi ku dhashay Gaalkacyo 1924 lehna Passaport N. 33156/3 ee 5.12.82 iyo Jaalle Xersi Axmed Maxamuud ku dhashay Gaalkacyo 1945 lehna W.A.L. 55715 B.H. Xamar, oo aan aqoonsadey aniga Nootaayo ah.

Muqdisho, 26 Luulyo 1988

NOOTAAYAHA

(Dr. Maxamed Xaaji Saciid)

In the Name of the Privident

# CONSTITUTION

I. NAME:

The organization will be known as Istaageer Agricultural Development, herein after referred to as Istaageer.

II. INTERPRETATION:

1. Istaageer: This word, in Somali language, means supporting, helping or serving each other.

2. Wherever appropriate, throughout this constitution, the masculine shall be considered to include the feminine and the singular the plural.

III. STATEMENT OF PURPOSE:

Istaageer Agricultural Development is established to improve the quality of life in rural Somalia by meeting basic needs and helping increase self_reliance in food production.

IV. MAIN OFFICE:

The head office of Istaageer will be situated in Mogadishu, Somalia. In case of need and/or expansion of the services of Istaageer, branch offices could be opened at other appropriate centers in the country.

V. SERVICE OBJECTIVES:

The food security of the nation is much more important than any other security need, and Somalia is faced with the task of feeding its people. This need is far from being met and, Istaageer will strive, with the help of other national and international NGO's, to further agricultural development. The organization will especially engage in agricultural development and education of small_scale farmers and small income_generating community development on humanitarian basis. Istaageer's central objective shall be to assume a major role in solving food shortages among communities on long range basis.

Istaageer shall strictly remain and operate as a non_profit indigenous NGO and non_political organization. In furtherance of the objectives, but not further or otherwise, Istaageer shall exercise the implementation and/or participation of the following principal services.

1. To assist farmers in the legal aspects of land procurement;

2. To provide technical assistance to farmers (small_scale farmers);

3. To assist in irrigation needs (canals etc.-;

4. To help provide water (hand-dug or drilling of water wells for farmers);

5. Production (from animal bones) and procurement of fertilizers;

6. Provision of seeds;

7. Pests control (and procurement of pesticides);

8. Support on small_scale farm implements;

9. Agricultural education (and other types of training);

10. Nurseries (for planting fruit trees) and forestry;

11. Creation of small income_generating projects for communities;

12. Animal husbandry and production of cheese, butter and ghee;

13. Alluminium recycling and production of solar stoves;

14. Vegetables drying and fruits preservation;

15. Health (medicines, hospital and laboratory instruments procurement);

16. Emergency/disaster participation (floods, food shortages, clothings);

17. And any other charitable projects withing the reference of the aims and objectives of the organization as deemed appropriate by the management.

VI. OTHER OPJECTIVES/POLICIES:

1. To collaborate and co_operate as considered appropriate with national and international non-governmental and governmental organizational and international non_governmental and governmental organizations.

2. To merge or affiliate with, aquire and/or take over any charitable organization and all or any assets in furtherance of Istaageer's objectives.

3. To carry into effect the objectives of Istaageer, by making proper arrangements and for this purpose provide in whole or part remunerations of all employees and other ex_

penditures to the management of the organization.

4. To raise funds primarily from funding organizations and individual donors as shall be considered appropriate, legal and expedient without undertaking any transaction where profit-seeking is involved; and reserve the right to accept or disclaim any donation or assistance without prejudice to the generality of Istaageer.

5. To open and maintain a banking account or accounts in the name of Istaageer at any bank and at any time as may be deemed necessary; and to do all such other legaly permissible activities in furtherance of the organization's objectives.

VII. THE EXECUTIVE BOARD:

The Executive Board of Istaageer shall consist of the following officers.

1. Chairman
2. Vice-chairman
3. Executive Director
4. Treasurer
5. Secretary

Some of the Executive Board offices may not be utilized at times if so deemed appropriate by the management. The responsibilities and the positions of the Executive Board are reviewable at any time considered appropriate by the majority of the Executive Board and the Founders.

RESPONSIBILITIES OF THE EXECUTIVE BOARD

1. The Chairman

The chairman is to function as one of the principal leaders of the organization and will be responsible for the presiding over all meetings of the executive board, unless otherwise prevented by a force majure or other reasonable cause. The Vice-chairman will closely work with the chairman and perform his duties when he is absent.

2. The Executive Director

The responsibility of the Executive Director is to function as one of the principal leaders of the organization and will be responsible for the execution of the organizatoin's managerial operations.

3. The Treasurer/accontant

Based on the decisions and directions of the manage-

ment, the treasurer will perform the duties of receiving and disbursing of organization funds and should issue receipts for moneys received and maintain vouchers for disbursemen-ts. As a whole, the treasurer will be responsible for the organization in the matters of financial record-keeping, preparation of financial statements and preservation of accounts and books for auditing and/or inspection.

With the prior consultation and approval of the management, the treasurer could delegate part of his duties to another employee under his supervision and will be hold responsible for the proper appropr'ation. All funds disbursed on behalf of the organization will be authorized by the management Board (esp. the executive director). The executive management will be responsible for all the managerial duties of the organization and may give leadership and direction to the employess in a manner commensurate with the aims and objectives of the organization.

4. THE SECRETARY

Under the directions of the management, the secretary, besides being responsible for the performance of all the normal secretariate duties of the organization, will carry out all the duties pertinent to the correspondence, preparations of of schedules to convene meetings and keeping minutes and preservation of records of organization proceedings.

VIII. EXECUTIVE BOARD MEETINGS

The Executive Board will hold meetings at least once a month. The Chairman, or in his absence the vice-chairman or in the default of both these, the Executive director will preside all meetings of the organization. The quorum for the executive board meetings will not be less than fifty percent. Any member failing to attend three consecutive meetings of the without some genuine cause, should receive a written notice for justification from the chairman. However, at the event that such a member fails to come up with justifiable reason or continues to be absent from meetings, the rest of the management will take action and he shall cease to be a member of the Board.

At his discretion, the chairman shall decide the number of persons allowed to speak against a motion or in favor of it.

and resolutions will be made by a simple vote of raising hands.

IX. THE ADVISORY BOARD

The Advisory Board of Istaageer shall be composed of two (2) agriculturists with adequate experience and an economist. The advisory board shall be charged with responsibilities for the organization and their number shall be not less than three (3) persons at any one time.

X. SUPPORTERS/CONTRIBUTORS

Any organization or person, regardless of country, nationality, race, color and faith shall be eligible for becoming a supporter, donor or a contributor of Istaageer, such supportship being subject to the consent of the Executive Board. The principal function of a supporter, contributor or a donor, is to assert his support to the organization both inword and action, but cannot claim any special rights rr privileges. The executive board of the organization reserves the sole power and responsibility to sanction or reject any offer or application of supportership.

Supporters shall be expected to pay an amount of subscription individually as may be decided from time to time by the management and the founders of the organization. Any supporter desiring to resign from the organization's patronship, shall have the right and privilege to do so: however, such resignation will not take effect until the Founders have given due consideration to the matter. The executive board with the knowledge of the Founders shall have the authority to discontinue and/or exclude any supporter from his supportership for a specified time period on such grounds that he acts in a manner inconsistent or deterimental to the policy and the interest of the organization.

Any organization or person who gives up or expelled from the status of being a supporter or contributor, will not be entitled to any reimbursement of contributions or subscriptions or any part thereof or any value contributed by him at any time.

The Founders of Istaageer shall be vested with the responsibility for Il the properties, funds and investments acquired in the name of the organization. In order to promote and achieve in practice the set activity objectives Istaageer shall seek and endeavor to facilitate collaboration and coope-

ration with other indigenous and international NGOs, in particular, the organization shall work together with funding organizations as equal partners in designing programs and development porjects.

Istaageer shall cooperate with any organization and will make agreements with them to obtain any aid in the form of materials, funds, services or organizational objectives.

XI. THE FOUNDERS

The Founders, who function both in the Advisory Board and the Executive Board, shall be consulted in all decisions as the final authority in the decision making of the organization's affairs. They may overule any decision if they have reason to believe that it is against the interests and the objectives of the organization. The Founders shall remain as the supervisors of the organization for life (their names appear at the end of this consitution).

XII. AUDITING

An auditor who is not an office holder of the organization, shall be appointed for every year to audit all the records, accounts and the books of the organization.

The treasurer or the accountant of the organization will produce all the necessary documents to be audited to the auditor and the auditor shall be expected to either certify the records as correct and vouched in accordance with proper accounting principles and organizational policies or state his opinion and findings to the contary.

XIII. AMENDMENTS

The constitution of the organization can be amended, if the amendment so proposed is approved by the Founders with the consultation of the management.

XIV. DISSOLUTION

If the Founders, with prior consultation of the Executive Board and the Avdisory Board, decides unanimously that the object of this constitution cannot and will not continue to be carried out or at any ime determines that it is advisable to discontinue the organization, the assets remaining af-

ter all debts and liabilities are satisfied, could be given to a chantable organization, or shall be supervised by the Founders in the best way appropriate.

XV. Istaageer Agricultural Development shall be entitled to exemptions from import and customs duties on materials and equipment specifically imported for the implementation of the organizations programmes (REF, Law No. 21 of 26.8.63 article 58).

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Ibraahim Maxamed Cali.

HADDUU TIXGELIYEY: In ay Dhumeen 2 J/War. Lr. kala yahay 1264996,1264998, ee Laga sameeyey L/Baydhabo ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed kuna jirto Lacag dhan midkiiba Sh.So. 100.000,100.000, kuna qoran magaca Ibraahim Maxamed Cali Sida ku cad warqadda Lr. 0217 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Baydhabo.

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Shareciga Lr. 9.9.1962.

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegaga War., Lr. kala yahay 1264996,1264998, kuna jirto Lacag dhan midkiiba Sh.So 100.000,100.000, kuna qoran magaca Ibraahim Maxamed Cali Laga na sameeyay L/Baydhabo ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed.

### WAXAA LA AMRAYAA

L/Baydhabo ee Bankiga Gancsiga iyo keydka Soomaaliyeed in ay siiso J/le Ibraahim Maxamed Cali Lacagta Cadadeeda tahay isugeyn sh.so. 200.000, oo ah bedelkii Jeegaga War. ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareeyn 15 maalmood Laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan laga keenin wax ishortaag ah.

Muqdisho, 9.1.1989.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 56

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Faay Dheere Qumane.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay B/Kyed Lr. 3213 Kuna jirto Lacag dhan sh.so. 399.612.80 Kuna qoran ma gaca Faay Dheere Qumane Sida ku cad Warqadda Lr. Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/3aad.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) B/Keyd Lr. 3213 Laga Sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/3 kuna jirto Lacag dhan sh.so. 399.612.80 kuna qoran magaca Faay Dheere Qumane.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/3aad in ay siiso J/le Faay Dheere Qumane Lacagta Cadadeedu tahay sh.so. 399.612.80 oo ah bedelkii B/Keydka kor ku xusan mar kay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 30 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah aan Laga keenin.

Muqdisho, 28.2.1989.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 57

MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBEED

MGH/2/1989 Hargeysa 8.2.89

UJEEDDO:- Degreeto ah Cusboonaysiin Jeegag W. Lumay

| J.W.Lr. | Sh.So. | Taariikh. | Magaca ku qoran | | |
|---|---|---|---|---|---|
| 1. 1018963 | 100.000 | 26.1.89 | Ismaaciil | Xaashi | Diiriye |
| 2. 1018964 | 100.000 | » » » | » | » | » |
| 3. 1018965 | 100.000 | » » » | » | » | » |
| 4. 1018966 | 100.000 | » » » | » | » | » |
| 5. 1018967 | 100.000 | » » » | » | » | » |
| 6. 0080402 | 452.000 | » » » | » | » | » |

Kusimaha Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed

MARKUU ARKAY: Arjiga uu Maxkamadda u soo qortay Ismaaciil Xaashi Diiriye ee uu ku codsanaayo in loo cusboo-naysiiyo Jeegagga Wareega ee ka lumay ee kor ku xusan;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangiga Ganacsiga iyo Kayd ka, Laanta 3aad, ee Hargeysa ee la qoray 5.2.89 ee uu u kala diray laamihiisa iyo Xisaabiyaha Guud;

MARKUU ARKAY: Xaashida ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta 3aad, Hargeysa ee lambarkee-du yahay No. 020 ee la qoray 6.2.89, ee Bangigu ku soo cad-deeyey in ay Jeegaggaas Wareega ee Lumay iska leeyihiin Astaamaha kor ku xusan;

MARKUU ARKAY: In lacagta ku qoran Jeegaggaas uu iska leeyahay Ismaaciil Xaashi Diiriye;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambar-kiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.1965.

WUXUU GO'AAMIYEY

In Jeegaggaas Wareega ee lumay la kansal gareeyo, loo-na cusboonaysiiyo ninka la yidhaahdo Ismaaciil Xaashi Dii-riye isagana gacanta laga saaro ama ciddii asaga ka haysata Awood Buuxda muddo 15 beri ah gudahood.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta 3aad Hargeysa in uu Nuqulka Go'aankan ku dhejiyo Bangiga Irdi hiisa, si ciddii haysata Jeegaggaas Wareega ee lumay ee kor ku xusan ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonayaan.

K/S Guddoomiyaha Maxkamadda G. Hargeysa

(Maxamed Bedel Dhicis)

Kaaliyaha Maxkamadda G. Hargeysa

(Axmed Wacays Maxamed)

L. 58

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Xasan Maxamed Cariif.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 0272368 oo Laga sameeyey L/Wardhiigley ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed kuna jirto Lacag dhan sh.so. 216.000 kuna qoran magaca Xasan Maxamed Cariif sida ku cad warqadda Lr. 2203 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed.

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

## WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 0272368. kuna jirto Lacag dhan sh.so. 216.000 kuna qoran magaca Xasan Maxamed Cariif lagana sameeyey L.W. Dhiigley ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed.

## WAXAA LA AMRAYAA

L/Wardhiigley ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed in ay siiso J/le Xasan Maxamed Cariif Lacagta Cadaadeedu tahay sh.so. 216.000 oo ah bedelkii J/War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 1.3.1989.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 59

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Ibraahim Cali Gaaboow;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg Wareega Lr. 0296158 oo laga sameeyey Laanta Hodon ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh So. 350.000 kuna qoran magaca Ibraahim Cali Gaaboow sida ku cad warqadda lam. 2205 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qeybta Xisaabaha Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0296158 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 350.000 kuna qoran magaca Ibraahim Cali Gaaboow lagana sameeyey Laanta Hodon ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

### WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Hodon ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Ibraahim Cali Gaaboow lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 350.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood. laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 1.3.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 60

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Axmed Cali;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 1184269, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Jaalle Aamina Maxamuud Baaruud, sida ku cad war qadda lam. 1268 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qeybta Xisaabaadka Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 1184269, laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qeybta Xisaabaadka Guud ku jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Aamina Maxamuud Baaruud.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qeybta Xisaabaadka Guud in ay siiso Jaalle Maxamed Axmed Cali lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 8.2.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 61

## MAXKAMADDA G. BANAADIR

## GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cumar Cali Sheegow;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga War. ee hoos ku xusan Lambarradooduna kala yihiin sidan:

| J W Lr | Sh So | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 1420550 | 100 000 | Cabdi Xasan Cabdi | 1aad Xamar |
| 1420551 | 100 000 | » » » | » » |
| 1420552 | 100 000 | » » » | » » |

oo laga sameeyey Laanta 1aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh So 300 000 kuna qoran magaca Cabdi Xasan Cabdi sida ku cad warqadda lam 2204 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xisaabaha Guud;

HADDUU ARKAY: Qod 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

## WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War ee kor ku qoran kuna jirto lacag dhan Sh So 300 000 kuna qoran magaca Cabdi Xasan Cabdi lagana sameeyey Laanta 1aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

## WAXA LA AMRAYAA

Laanta 1aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Cumar Cali Sheegow lacagta cadadeedu tahay Sh So 300 000 oo ah bedelkii Jeegagga War ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 1.3.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

MAXKAMADDA G. BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Xuseen Gaaboow Yabaroow;

HADDUU TIXEGIYEY: In uu lumay Buug Kaydka Lam. 3191 laga sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 70 000 kuna qoran magaca J.le Xuseen Gaaboow Yabaroow, sida ku waraadda lam. 0142. ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kaydka L. 3191, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 70.000 kuna qoran magaca J.le Xuseen Gaaboow Yabaroow, lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Xuseen Gaaboow Yabaroow, lacagta cadadkeedu dhan yahay Sh.So. 70.000 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku xusan markay ka soo woreegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.2.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 63

## MAXKAMADDA G. W/GALBEED

MGH/3/1989 Hargeysa 22.2.89

UJ: Degreeto ah cusboonaysiin J.W. co lumay;

| J.W.Lr. | Taariikh. | Sh.So. | Magaca | | | Laanta |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1.A-1018624 | 28.5.88 | 100.000 | Maxamed | Aadan | Saban | L/3aad |
| 2.A-1018625 | » | 100.000 | » | » | » | » |
| 3.B-0594413 | » | 50.000 | » | » | » | » |
| 4.B-0594414 | » | 50.000 | » | » | » | » |
| 5.B-0594415 | » | 50.000 | » | » | » | » |

Ku-simaha, Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed

MARKUU ARKAY: Arjiga uu Maxkamadda u soo qortay Maxamed Aadan Saban ee uu ku codsanayo in loo cusboonaysiiyo Jeegagga Wareega ee ka lumay ee kor ku xusan;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka L/3aad ee Hargeysa ee la qoray 14.2.89 ee uu u kala diray laamihiisa iyo Xisaabiyaha Guud;

MARKUU ARKAY: Xaashida ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta 3aad ee Hargeysa ee lambarkeedu yahay No. 021 ee la qoray 16.2.89 ee Bangigu ku soo caddeeyey in ay Jeegaggaas Wareegaa iska leeyihiin astaamaha kor ku sheegan.

MARKUU ARKAY: In lacagta ku qoran Jeegaggaas Wareega uu iska leeyahay Maxamed Aadan Saban;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.1965.

### WUXUU GO'AAMIYEY

In Jeegaggaas War. ee lumay ee kor ku xusan la kansal gareeyo loona cusboonaysiiyo ninka la yidhaahdo Maxamed Aadan Saban isagana gacanta laga saaro ama ciddii isaga Awood Buuxda ka haysata muddo 15 beri ah gudahood.

### WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta 3aad ee Hargeysa in uu nuqulkan ku dhejiyo Bangiga irdihiisa si ciddii haysata Jeegagga War. ee lumay ee kor ku xusan uga soo qortaan cabasho haddii ay doonayaan.

K/S Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed
(Maxamed Bedel Dhicis)

Kaaliyaha Maxkamadda G. W/Galbeed
(Axmed Wacays Maxamed)

L. 64

MAXKAMADDA G. BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qoray J.le Safari Travel (Savoy Center);

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga War. oo lambarradoodu kala yihiin sidan:

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 0291590 | 142.760 | Safari Travel (Sevoy Center) | 1/Xamar |
| 0291591 | 142.760 | » » » » | » |
| 029592 | 142.760 | » » » » | » |
| 0286991 | 142.760 | » » » » | 2/Xamar |
| 0287008 | 142.760 | » » » » | » |

laga sameeyey laamaha kor ku xusan ee Bangiga Ganacsiga Kaydka Soomaaliyeed sida ku cad warqadda lam. 3021;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee lam. kor ku xusan yihiin kuna jirto guud. ahaan lacag dhan Sh. So. 713.800 kuna qoran magaca Safari Travel (Savoy Center) lagana sameeyey laamaha kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laamaha 1aad Xamar iyo 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiyaan J.le Safari Travel (Savoy Center) lacagta cadadeedu tahay Sh. So. 713.800 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo woreegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah

Muqdisho, 29.2.1989
Muqdisho, 28.2.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 65